

JADWALKA WAQTIGA EE SHEYBAR MANDHACIIRKAAGA

SHEYBAARKA MANDHACIIRKA
WAXAY BALANSATAHAY:

TAARIIQDA:

WAQTIGA:

PICOPREP® BACDA 1

TAARIIQDA:

WAQTIGA:

PICOPREP® BACDA 2

TAARIIQDA:

WAQTIGA:

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan baaritaankaaga
ama diyaarinta, la xiriir dhaqtarkaaga ama kalkaalisada.

Waxaa jiro fiidiyaha tilmaamaha ee muujinayo sida la isugu daro
oo looga qaato Picoprep **medicininstruktioner.se** (gudaha Swedish).
Aaga waxaad sidoo kale aqrin kartaa oo aad ka dajisan kartaa tallo
iyo cuntada si sahlan u shiidanto cuntada la cunayo ka hor baaritaanka.



PICOPREP®

PICOPREP (Sodium picosulfate, magnesium oxide, citric acid.)

Aasaaska: Budada ee biyaha afka.

Tilmaanta: Picoprep waxaa loo tilmaamay rdadka weyn, qaangaarka iyo carruurta ka bilow da'da hal.
Diyaarinta mandhaciirka baaritaanka Raajada ama sheybaarka dhuunta. Diyaarinta mandhaciirka markii
loo arko caafimaad ahaan inay muhiim tahay ka hor qaliinka. Furaha ATC: A06AB58.

Cabirka gadaal: 2 bacood. Rx, F. SPC la cusbooneysiyyay 08-08-2016

Wixii warbixin dheeraad ah iyo qiimeynta, fiiri www.fass.se.
Marwalba raac tilmaamaha qoraalada dhaqtarkaaga. Baro nafsadaada warqada warbixinta bukaanka
ee ku lifaaqan baakida ka hor inta aadan isticmaalin alaabta.




Ferring Pharmaceuticals AB, Box 4041, SE-203 11 Malmö, Sweden. Tel: +46 40-691 69 00. info@ferring.se, www.ferring.se



PICOPREP®



TILMAAMAHA DIYAARINTA SAXARADAADA SHEYBAARKA MANDHACIIRKA KA HOR



Somaliska / Soomaali



TILMAAMAHA DIYAARINTA SAXARADAADA SHEYBAARKA MANDHACIIRKA KA HOR

Dhaqtarkaaga/kalkaalisadaada ayaa kuu soo gudbisay sheybaarka mandhaciirka. Warqadaan waxay kuu sheegeysaa qaabka ugu wanaagsan ee loogu diyaariyo nafsadaada baaritaankaan. Baro nafsadaada warqada warbixinta bukaanka ee ku lifaaqan baakida ka hor inta aadan isticmaalin alaabta.



WAA MAXAY SHEYBAARKA MANDHACIIRKA?

Inta lagu jiro sheybaarka mandhaciirkaaga, dhaqtarkaaga/kalkaalisada waxay la isticmaaleysaa, qalabka baaritaanka dabacsan (sida qara weyn ee fartaada tahay) waxaa loo yaqaan sheybaarka mandhaciirka. Waxaa la gelinayaa dabadaada, illaa dhinaca dhammaadka dabada ee mandhaciirka weyn. Waxaa lagu siinayaa suuxdin inta lagu jiro baaritaanka. Qofka la baarayo sida badan wuxuu dareemaa wax yar ama xanuun la'aan gabi ahaanba inta lagu jiro baaritaanka. Sheybaarka mandhaciirka wuxuu leeyahay nal iyo kaamiro u suurtoogleyso in mandhaciirka la eego.



MUXUU SHEYBAARKA MANDHACIIRKA SAMEEYA?

Sheybaarka mandhaciirka waxaa loo isticmaalaa in lagu baaro saxaradaada oo la ogaado:

- **Bararka (bararka iyo/ama gaduudashada)**
- **Burooyinka**
- **Xaaladaha kale ee kansarka hore ama kansarka suurtoogalka ah**
- **Sababaha kale ee dhibaatooyinka mandhaciirka**

Baaritaanka sidoo kale wuxuu u suurtoogalinayaa dhaqtarkaaga/kalkaalisada inay ka saaraan burooyinka ka hor inta aysan kansar noqon, oo qaado tijaabo yar ee xuubka darbiyada (muunada) oo falanqeyn dheeraad ah.



MAXAA MUHIIM U AH SHEYBAARKA MANDHACIIRKA UU GUUL AH?

Sheybaarka mandhaciirka wuxuu ku bilowdaa saxaro nadiif ah, oo ebar ah. Tani waxay u suurtoogalineysaa dhaqtarkaaga/kalkaalisada inay arkaan oo baaraan saxadaraada ee xaaladaha ku haboon. Haddii aad kala qeybgashid baaritaanka iyada oo saxarada weli ku jirto mandhaciirkaaga, waxay adkeysaa in la arko oo la qiimeeyo haddii ay jiraan burooyin ama kansar mandhaciirkaaga, iyo waxaad ku soo laaban kartaa in lagu baaro taariiq dambe.

SIDA NADIIFKA AH EE MANDHACIIRKAAGA YAHAY, SIDA WANAAAGSAN EE SHEYBAARKA MANDHACIIRKA

Si loo diyaariyo sheybaarka mandhaciirka oo guul ah, mandhaciirkaaga waa in guud ahaan la nadiifiyaa. Raac tilmaamaha ka imaanayo daryeel bixiyahaaga caafimaad. Cab biyo cad oo badan ka hor inta aadan bilaabin daaweynta, oo u samey diyaarinta si buuxdo sida waafaqsan tilmaamaha.

DIYAARINTA SHEYBAARKA MANDHACIIRKAAGA

TILMAAMAHA CUNTADA

Heerka 1:

Inta u dhaxeysa 7 iyo 2 maalmaha ka hor baaritaanka waa inaad cuntaa cuntada sahlan inay shiidanto. Waa inaad ka fogaataa qamadiga, looska iyo miraha, iyo cuntada ku adag inay shiidanto, sida mashruumka, ulaha qudaarta, basasha, basbaaska, galeyda iyo miraha ceyrinka ama qudarata. **Gudaha 24 saacadood baaritaanka ka hor** ha cunin wax cunto adag. Cab kaliya **biyo cad. Tusaalooyinka biyaha cad waa:** biyaha, biyaha midabeysan (ma ahan gaduud), juuska tufaaxa, maraqa, cabitaanada cad ee ciyaaraha iyo cabitaanada soodhada oo aanan laheyn qeybaha midabka xoogan, qamriga aalkulada ku hooseyso, biyaha Biyo Gelinta (ee farmashiiyaha, oo aanan laheyn qoraalada dhaqtarka), cabitaanada cad ee nafaqada, biyaha malabka, kafeega iyo shaaha caanaha aanan laheyn. **Ha ibin biyo kaliya!**



PICOPREP® waa daawo la qoro ee loo isticmaalo in lagu nadiifiyo mandhaciirkaaga. Picoprep waxay leedahay dhadhanka bambeelmada. Picoprep waxay ku siineysaa shuban oo dhoor saacadood ah. Tani waxay nadiifisaa mandhaciirkaaga, oo u suurtoogalinayo dhaqtarkaaga/kalkaalisada inuu ku baaro oo si cad ah u arko saxaradaada.

QAADASHADA PICOPREP®

Heerka 2:

Dir bacda **koowaad oo 150 ml biyo qabo iyo qas 2-3 daqiiqo**. Cab biyahaan 10-18 saacadood ka hor sheybaarka mandhaciirkaaga, waxaa xigo waqtiyeynta dhaqtarkaaga/kalkaalisada ay ku qoreen tilmaantaan.



Heerka 3:

Cab ugu yaraan **shan 250-ml galaasyo ee biyaha cad** kadib dhoorka saac ee xigo.



Heerka 4:

Ku celi heerka 2 4-6 saacadood ka sheybaarka mandhaciirka, waxaa xigo waqtiyeynta dhaqtarkaaga/kalkaasiada wuxuu leeyahay qoraalka tilmaantaan. **Cab ugu yaraan sadex galaas oo biyo cad ah** kadib dhoorka saac ee xigo. **Haddii aad dareentid oon, waad joogteyn kartaa inaad cabtid biyo cad illaa laba saac baaritaanka ka hor.**



KADIB SHEYBAARKA MANDHACIIRKAAGA

Baaritaanka kadib, dhaqtarkaaga/kalkaalisada waxay kuu sheegayaan waxa ay ku arkeen mandhaciirkaaga. Haddii wax muuno ah laga soo qaaday, waxaa lagu siinayaa natiijada waqti dambe.



WEYDII SAAXIB AMA XUBINTA QOYSKA INUU KULA JIRO

Waxaa lagu siin karaa suuxdin baaritaanka ka hor. Tani waxay la micna tahay kuuma suurtoogaleyso inaad si badbaado ah gaari u kaxeysid, oo way ku adkaan kartaa inaad guriga kaligaaga aadid. Marka waa inuu qof kula imaadaa oo ku wadaa baaritaankaaga kadib. Calooshaada waxay dareemi kartaa dibir iyo gaas baaritaanka kadib. Aastaamahaan waxay dhammaanayaan dhoor saacadood kadib.



GADAAL GURIGA

Naso inta ka hartay maalin baaritaankaaga. Bilow cunis markale oo qeyb yar, taas oo aad tartiib tartiib u kordhin kartid illaa aad dib ugu laabatid qaadashadaada cuntada caadiga ah.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee ku saabsan baaritaankaaga ama diyaarinta, la xiriir dhaqtarkaaga ama kalkaalisada.

Waxaa jiro fiidiyaha qalabka ee muujinayo sida la isugu daro iyo qaadashada Picoprep [medicininstruktioner.se](https://www.picoprep.se) (oo af Swedish). Aaga waxaad sidoo kale aqrin kartaa oo aad ka dajisan kartaa tallo iyo cuntada si sahlan u shiidanto cuntada la cunayo ka hor baaritaanka.

